

Qaybta Caafimaadka Habdhaqanka ee Gobolka Multnomah (BHD) waxa ay bixisaa adeegyada caafimaadka maskaxda. Adeegyada waxa lagu siiyaa si bilaash ah dadka waaweyn iyo qoysaska. La taliyayaasha Caafimaadka Maskaxda waa kuwo xirfadlayaal caafimaadka maskaxda ah sida uu qeexayo Gobolka Oregon. Dhammaan la taliyayaasha liisanka haystaa waxa ay buuxinayaan dhammaan shuruudaha xirfadle nimo, akhlaaqnimo iyo sii wadida waxbarasho ee guddiga liisan siinta xirfadlayaasha. Xog dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada iyo tababarada la xidhiidha waxa la bixin doonaa marka codsi uu yimaado. Dhammaan la taliyayaashu waxa ay shaqeeyaan iyagoo ay kormooreerayaan kormeerayaasha xarunta caafimaad iyo la taliyaal dhakhtarrada maskaxda ah.

Dhammaan shaqaalaha BHD waxa ay mamnuuci doonaan takoorka waxayna hubin doonaan in dhammaan dadka helaya adeegyada:

- Ay yihiin kuwo si sharaf iyo ixtiraam leh loola tacaamulayo
- Ay yihiin kuwo helaya adeegyo dhaqan ahaan shaqaynaya
- Ay yihiin kuwo helaya adeegyo ka warqaba una shaqaynaya si ku habboon kala duwanaanshiyaha jinsiyeed
- Ay yihiin kuwo leh xorriyad diineed

#### **Qof kastaaba waxa uu xaq u leeyahay inuu:**

Bixiyo oggolaanshiyo la wargaliyey oo qoraal ah kahor bilawga adeegyada, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ee caafimaad ama mararka uu sida kale u oggolaanayo sharcigu.

Diido adeegyada; Haddii ay jiraan wax natiijooyin ah oo khattar ah oo ka iman karta diidmada adeegyada, natiijooyinka waxa looga sharrixi doonaa afka iyo qoraalba tanoo uu usheegi doono bixiyaha daaweyntu qofka isagu bixinaya oggolaanshiyaha. Diidmada adeegyada waxa lagu diiwaan gelin doonaa diiwaanka caafimaadka maskaxda ee qofka.

Ka doorto adeegyada iyo taageerooyinka kuwaas oo la jaanqaadaya qiimayntooda iyo qorshahooda adeegga. Adeegyada waxa lagu bixin doonaa meesha ugu isdhexgalka badan bulshada oo lehna shuruudo iyagu sida ugu yar u xaddidaya xorriyada qofka, sida ugu yar udhex galaya arrimaha qofka, oo markaasina bixinaya heerka madax-bannaaniyeed ee ugu sarreeya.

Dhammaan adeegyada loo sharraxay, sharraxaaddan oo ay ka mid tahay natiijooyinka la filayo inay ka soo baxaan iyo khattaraha macquulka ah.

Leh saaxiib, xubin qoys, xubin wakiil ah, ama udoode jooga inta lagu gudo jiro ballamaha iyo wakhtiyada kale hadba sida loogu baahdo iyada oo la raacayo hagitaannada caafimaadeed.

Hela ogeysiis inta aan la wareejin ah, haddii aanay jirin khattar qofka caafimaadkiisa ama amnigiisa kusoo fool leh oo u baahan wareejin adeegyada ah.

In warbixin laga bixiyo dhacdooyinka xadgudubyada ama daryeel li'ida iyada oo aan markaasi aargoosi jirin. Qof kastaaba waxa uu xaq u leeyahay inuu helo adeegyo kuwaas oo aan lahayn xadgudubyo ama daryeel li'id, tijaabin, ama xidhxidhid iyo go'domin.

Inuu samayn karo cabasho ku saabsan adeegyada iyo taageerooyinka, iyada oo aanu aargoosi jirin, iyada oo la wacayo Laynka Cabashada ee 503-988-8600 ama xubin shaqaale BHD da ah oo kale.

In uu sameyn karo caddayn sheegaysa daaweyn caafimaadka maskaxda ah.

In uu helo xog iyo agab iyada oo ah foom qoraal ah ama qaab kale ama luuqad ku habboon baahiyaha qofka.

In uu marin u helo diiwaanka caafimaadka maskaxda ee naftooda ama ta ilmahooga. Koobbi diiwaanka ah ayaa diyaar laga dhigi doonaa shan cisho gudahood marka aad codsi soo dhiibato. Wax kharashi kuma jiro.

Qarsoodida; dhammaan xogta ku saabsan dadka waxa lagu ilaalin doonaa qarsoodi marka laga reebo marka oggolaanshiyo la bixiyo iyada oo lagu bixinayo wadaagid xog oo saxeexan ama marka uu waajibinayo sharcigu in shaaca laga qaado.

Shaqaalaha BHD waa warbixiyayaal ay waajib ku tahay inay ka warbixiyaan xadgudubyada waxaana looga baahan yahay inay shaaca ka qaadaan xog sida hoos ku cad:

- A. Uwarbixinta Adeegyada Ilaalinta caruurta ama hay'ad sharci fulineed oo kale oo habboon marka ay jirto sabab ay uga shakiyaan xadgudubka ama daryeel li'ida ilme sida uu waajibinayo ORS 419B.010 iyo qaybaha soo socda.
- B. Uwarbixinta Adeegyada Ilaalinta sida ku habboon marka ay jirto sabab looga shakisan yahay xadgudub qof weyn oo da' ah sida uu waajibinayo OAR 411-020-0020.
- C. Uwarbixinta Adeegyada Ilaalinta sida ku habboon marka ay jirto sabab looga shakisan yahay xadgudub dad kuwaas oo iyagu leh naafanimo caqli ama jidheed sida uu waajibinayo ORS 430.755 — 430.765.